

Dhaqaale 7

Sida ugu fiican ee loo isticmaalo Dhaqaale 7

Waa maxay Dhaqaale 7?

Dhaqaale 7 waa qiimo koronto, kaasoo kuu ogolaanaayo inaad isticmaasho korontada todobo saacadood habeenkii adigoo bixinaayo qiimo aad uga jaban kan maalintii.

Sida looga faa'iideeysto

Dhaqaale 7 wuxuu aad ugu haboon yahay kululeynta biyaha.

Hadii aad ku dhejiso (rakibto) saacad laga hagayo waqtiyada isticmaalka waxaa hubaal ah ineey suurogal kuu noqoneeyso inaad ku kululeysato biyahaaga habeenkii qiimo jaban.

Hadii aad tahay qof aroorti hurdada ka toosana kirligaada waad karkarsan kartaa, quraac waad sameeyan kartaa ka hor 7-8da subaxnimo waqtiga kulaylaha.

Haddii uu koronto qubeeyskada ku shaqeyana waad isticmaali kartaa aroorti hore.

Waqti dhowrayaal aan saas qaali u sii aheeyn ayaa kuu ogolaan kara inaad ku buuxsato makiinadahaaga ku shaqeyna korontada habeenkii, sida kuwa dharka lagu dhaqo, kuwa maacuunta lagu dhaqo, qalajisada iwm.

Adigoo ka faa'iideeysanaayo qiimaha jaban ee Dhaqaale 7.


La soco mar walba isticmaalkaaga koronto.

Qor isticmaalkaaga markuu caadiga yahay iyo markuu hooseeyo.

Isku day marba marka ka danbeeya inaad isticmaalkaada koronto sii yareeyso, Kuna fikir inaad makiinadaha aad isticmaasho waqtiyada habeenkii oo eey korontadu jaban tahay.

Kuleyl keydiyeyasha waxaa loogu tala galay in lagu isticmaalo Dhaqaale 7.

Isku day inaad fahanto habka ugu wanaagsan oo eey u shaqeyaan.



Economy 7 meters show electricity usage for both day-time and night-time rates

Photo: NilexUK

Warbixino ku saabsan sida ugu wanaagsan ee loo isticmaalo kuleyl keydiyeyasha waxaad ka heleysaa xafiiska dowlada hoose qeybtiisa kooxda korontada guryaha.

Waqtiyada Dhaqaale 7

Dhaqaale 7 waxaa la helaa inta u dhaxeysa 12ka saqdii dhexe ilaa 7da subaxnimo waqtiyada qaboobaha iyo 1da habeenimo ilaa 8da subaxnimo waqtiyada kuleylaha. Haddii aad qorsheeyso inaad isticmaasho korontadaada waqtiyadan aan kor ku soo sheegnay, waxaa kuu baaqaneysa lacag badan.

Qiimaha Dhaqaale 7

Korontada aad isticmaasha waqtiyada Dhaqaale 7 la helo waxeey kugu kaceeysaa qarash ka yar, bar kan aad bixiso korontada aad isticmaasho waqtiyada kale.

Qiyaas ahaan haddii aad boqolkiiba shan iyo toban 15% korontada aad isticmaali laheeyd waqtiyada caadiga ah aad u bedeletid inaad isticmaasho waqtiyada Dhaqaale 7 waxaa kuu baaqaneysa lacag.

Uma baahnid inaad leedahay kuleyliye ku shaqeyna koronto si aad oga faa'iideeysato Dhaqaale 7.

Cabirka Dhaqaale 7 (*meter*)

Xisaabiyaha Dhaqaale 7 wuxuu leeyahay labo meelood oo eey nambaro ku qoran yihiin.

Mid waxaa loogu tala galay isticmaalka habeenkii si yar kan kalena maalintii si caadi ah

Waa inaad mar walba fiirisaa si aad u hubiso isticmaalka korontadaada iyo biilka lagu soo diro.

Cabirku wuxuu xisaabiyaa isticmaalkaada oo dhan, kan korontada, biyaha kululeyntooda, makiinada cuntada, qaboojiyaha iyo qalabyada kale.

Cabirka xisaabiyaha isagaa keligiis is badala oo looma baahna inaad adiga gacantaada ku bedeshid.

Talooyin ah in la xusuusto

Waxyaabaha qaaska ee lagaa doonayo inaad xusuusato.

- 1 Dhaqaale 7 wuxuu ku siinaayaa 7 saacadood oo qiima jaban ood isticmaasho korantada habeenkii, taana waxeey kuu bad baadineysa lacag.
- 2 Dhaqaale 7 wuxuu sifiican u shaqeeyaa markii kuleylka la keydiyo isla markaana hoos ayuu u dhigaa qiimaha.
- 3 Dhaqaale 7 wuxuu yareeyaa kuleylka biyaha habeenkii adigoo isticmaalaya kuleeyl xadidan iyo meesha laga maamula (*time switch controller*)
- 4 Isticmaal saacada godadka korantada si hoos loogu dhigo yareenteeda.
- 5 Hadii aad biilka korontada ku bixisid (*direct debit*) badanaa waxaa laga yaabaa inuu qiimaha biilka kuu yaraado oo eey lacag kuu dhaqaaloowdo.
- 6 Iskuday inaad yareeyso isticmaalka caadiga ah.
- 7 Hadii aad siticmaali karto ama aad u wareejin karto ilaa 15% korantadaada isticmaalkeeda ilaa 7 saacadood habeenkii. Wax baa kuu bad baadayo adigoo isticmaalayo Dhaqaale 7.

Hadaad u baahantahay talo ku saabsan isticmaalka korantada guryaha (luqada English ka) waxaad nagala soo xariiri kartaa: taleefoon bilaash ah **0117 934 1957** ama **0800 082 2234**; iimeylka home.energy@cse.org.uk

For home energy advice, contact us on **0117 934 1957** or Freephone **0800 082 2234** or email home.energy@cse.org.uk

This is one of a series of advice leaflets in Somali produced by the Centre for Sustainable Energy. Download them free from www.cse.org.uk/somali-leaflets

Habka looga hortagi karo qoyaanka, dhedada ama uumiga keena (*Preventing damp and mould*)

Cabirka Korontada (*Digital Economy 7 meters*)

Dhaqaale 7 (*Economy 7*)

Ku kululeey aqalkaaga koranto (*Heating your home with electricity*)

Ka difaac Qabowga (*Insulating your home*)

Aqri cabirka korontada (*Reading your meter*)

Qeybta laga maamulo kuleyliyaha (*Setting a central heating programme*)

Talaabooyin muhiin u ah, hab isiticmaalka kuleyliyaha gaasta (*Tips on using your gas central heating*)

10 Talo oo Muhiim u ah Korantada (*Top 10 energy saving tips*)

Watch our energy advice videos for Somali speakers at www.bit.ly/1xwXfpx



St James Court
St James Parade
Bristol BS1 3LH

0117 934 1400
www.cse.org.uk
info@cse.org.uk

Charity: 298740
Founded: 1979

The Centre for Sustainable Energy is a national charity that helps people change the way they think and act on energy.

Our Home Energy Team offers free advice on domestic energy use to people in Bristol, Somerset, Wiltshire, South Gloucestershire and Dorset.



Contact us:

PHONE 0800 082 2234
EMAIL home.energy@cse.org.uk
WEB www.cse.org.uk/loveyourhome
FACEBOOK EnergySavingAdvice
TWITTER @cse_homeenergy